SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA SOOMALIYA



SEBTEEMBAR 2026

www.nbs.gov.so I @nbs_somalia I snb@nbs.gov.so I 25261 4960003

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Soomaaliya

Hordhac

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waa tilmaame dhaqaale oo muhiim ah oo hal beeg u ah isbeddelka guud ee isugeynta boqoleyda ee sicirka tafaariiqda ee badeecadaha iyo adeegyada ay iibsadaan qoysaska Soomaaliyeed. Waxay u adeegtaa sida qiyaasta asaasiga ah ee sicir bararka, ayada oo awood u siineysa siyaasad-dejiyeyaasha, ganacsiyada, iyo cilmi-baarayaasha si ay u qiimeeyaan isbeddellada ascaarta una sameeyaan go'aamo dhaqaale oo maan-gal ah. Tan iyo Janaayo 2025, TSB-da Soomaaliya ayaa la sii daayay iyadoo la tixgelinayo hal beegyo cusub oo laga soo qaatay SAHANKA MIISAANIYADDA QOYSKA SOOMAALIYEED 2022 (SIHBS), iyadoo lagu lifaaqaayo kalasaarida cusub ee kharashka qoyska (COICOP 2018), warbixintaan waxey ka turjumeysaa dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ah. qoraal habraac ah ayaa laga helindoonaa Bogga Internet-ka ee SNBS.

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waxaa lagu qeexay sidan:
Cabbirka isbeddelka celceliska miisaanka leh ee qiimaha tafaariiqda ay macaamiishu ku bixiyeen agabka iyo adeegyada mudo cayiman." meelaha ugu muhimsan ee TSB-da loo adeegsan karo waxaa ka mid ah:

- Cabirka Sicir-bararka: Sicir-bararka sannadlaha ah (YoY) wuxuu isbarbar dhigayaa qiimaha hadda jira sanadkaan iyo qiimaha isla xiligii sannadkii hore, isagoo u adeegaya sida qalab loogu talagalay siyaasadda lacagta iyo maaliyadda.
- Go'aan-qaadasho Dhaqaale: Waxaa isticmaala hay'adaha dawladda, ganacsiyada, iyo hay'adaha caalamiga ah si loogu hagaajiyo mushaharka, qandaraasyada, iyo ka faa'iidooyinka bulshada.
- Falanqeynta Dhaqaalaha Guud: Waxay taageertaa qiimeynta awoodda wax iibsiga, hagaajinta qiimaha kharashka-nololeed, iyo xasilloonida dhaqaalaha.

Habka Uruurinta Qiimaha:

- Joogteynta: Waxaa xogta la aruuriyaa toddobaadka koobad iyo kan saddexaad ee bil kasta.
- Deeganada laga soo uruuriyo: Muqdisho (Caasimadda), Dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (FMS).
- Ash'yaada ama badeecadaha: Tiradoodu waa 537 shey, oo laga soo xulay Sahanka SIHBS 2022, waxaana loo kala soocay si waafaqsan Kala-soocidda Isticmaalka Shaqsiga ee (COICOP) 2018 marka loo eego 13-ka qeybood.

Istaatistikada Muhiimka ah

Sannadle (Sebteembar 2026)

Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ilaa Sebteembar 2026, TSB-da ayaa sare u kacay (+6.8%.)
Qiima kororka ugu weyn ee laba iyo tobankii bilood ee laso dhaafay ayaa ahaa:

- Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+14.3%) waxaa sababay kororka kharashaadka dhaqanka iyo howlaha madadaalada.
- Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+13.7%) taas oo ka tarjumaysa kororka sii socda ee qiimaha maqaayadaha iyo adeegyada hoyga.
- Adeegyada waxbarashada (+11.5%) waxaa sababay kororka kharashaadka la xiriira waxbarashada.
- Caafimaadka (+9.6%) taas oo ka tarjumaysa kororka kharashaadka adeegyada caafimaadka iyo daaweynta.
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+9.2%) waxaa sababay kororka kharashaadka la xiriira guryaha iyo adeegyada aasaasiga ah

Isbeddellada hoos u dhacayada is dheellitiraya: waxaa ka mid ahaa:

- Cabitaannada kulul , Tubaakada iyo Maandooriyeyaasha (−0.4%).

Bishii (Sebteembar 2026)

Tusmada Sicirka Badeecadaha (TSB) waxuu kordhay 0.5% intii lagu jiray Bisha Sebteembar 2026.
Kororkii ugu weyn ee qiimaha bishan ayaa ahaa:

- Daryeelka Shakhsiga Ah, Daryeelka Bulshada Iyo Adeegyada Yar Yar (+1.2%)
- Cuntada iyo Cabitaannada (+1.0%).
- Caafimaadka (+0.9%) taas oo ka tarjumaysa kororka kharashaadka la xiriira caafimaadka.
- Maqaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+0.7%).

Isbeddellada hoos u dhacayada is dheellitiraya:

- Warbaahinta iyo Isgaarsiinta (−0.7%).
- Adeegyada Waxbarashada (−0.7%).
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (−0.3%).
- Madadaalada, Ciyaaraha iyo Dhaqanka (−0.3%).


Shaxda 1. TSB, isbadalada (%) Sanadlaha & Billaha ee Soomaaliya

	Isbedalka Billah ah (%)	Isbedalka Sanadlah ah (%)
Sebteembar	0.5%	6.8%
Ogoosto-26	0.4%	6.9%
Luulyo-26	0.6%	6.7%


WARBIXINTA TSB-da EE SOOMAALIYEED – DHAMAAN QEYBAHA TSB-da

Jaantus 1.Heerka Sicir bararka marka loo eego TSB-da Tixraca TSB

Isbadelka boqoleyda ee labo iyo toban bilood **MudadaTixraaca=2022**



Jaantuska 2. Qodobbada ka Qeyqaatay sicir bararka (%). (Qeybaha ka qeybqaatay)



War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sannadlaha ah

Muddo 12 bilood ah ilaa Sebteembar 2026, TSB-da ayaa sare u kacay 6.8%.
Kororada qiimaha ugu waaweynaa ee dhacay laba iyo tobankii bilood ee u dambeeyay waxay ahaayeen:

- Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+14.3%): taas oo ka tarjumaysa kororka kharashaadka adeegyada madadaalada, hawlaha dhaqanka iyo kharashaadka la xiriira wakhtiga nasiinada.
- Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+13.7%): taas oo ka tarjumaysa kororka joogtada ah ee qiimaha cuntooyinka maqaayadaha, adeegyada cunto-karinta iyo Qiimaha hoyga.
- Adeegyada Waxbarashada (+11.5%): taas oo ka tarjumaysa kororka khidmadaha waxbarashada, lacagaha dugsiyada iyo kharashaadka kale ee la xiriira waxbarashada.
- Caafimaadka (+9.6%): taas oo ka tarjumaysa kororka kharashaadka la kulanka dhaqtarka, daawooyinka iyo adeegyada daryeelka caafimaadka.
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+9.2%): taas oo ka tarjumaysa kororka kharashaadka guryaha iyo kordhinta lacagaha adeegyada aasaasiga ah, oo ay ku jiraan korontada, biyaha iyo shidaallada kale ee qoysaska.


Isbeddellada hoos u dhacayada is dheellitiraya, waxaa ka mid ahaa

- Cabitaannada Kulul, Tubaakada iyo Maandooriyeyaasha (−0.4%).

Shaxda 2. boqolkiiba isbeddelka heerka qaybta sannadlaha ah

QEYBAHA TSB	% - isbeddel sannadle ah		
	Juun-26	Luulyo-26	Sebteembar 26
WADARTA GUUD EE TSB-da	**6.7%**	**6.9%**	**6.8%**
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	7.9%	6.9%	5.6%
02 - TUBAAKADDA	1.5%	0.9%	-0.4%
03 - DHARKA IYO KABAHA	8.6%	8.7%	9.2%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	8.6%	9.6%	9.2%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH…	5.9%	5.4%	4.5%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	9.9%	9.8%	9.6%
07 - GAADIIDKA	-1.6%	0.9%	6.8%
08 – WARFAAFINTA IYO ISGAARINTA	-1.8%	-1.2%	1.0%
09 – MADADAALADA, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	14.3%	16.1%	14.3%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	9.3%	12.4%	11.5%
11 - MAQAAYADAHA IYO ADEEGYADA HOYGA	17.3%	16.5%	13.7%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	3.6%	7.7%	7.3%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR	-1.3%	4.1%	4.2%

Jaantuska 3. Heerka Qeybinta isbadalka boqoleyda ee sanadlaha ah



Warbixinta Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Bilaha.

TSB-da ayaa bishan kor u kacay 0.5% bishii Sebteembar 2026.
Kororka ugu muhiimsan ee qiimaha bishan waxay ahaayeen:

- Daryeelka Shakhsiga Ah, ilaalinta Bulshada Iyo Adeegyada Yar Yar (+1.2%) taas oo ay keeneen kororka kharashaadka alaabooyinka daryeelka shakhsiyeed, adeegyada shakhsiga iyo kharashaadka kale ee la xiriira.
- Cuntada iyo Cabitaannada (+1.0%) taas oo ka tarjumaysa kororka qiimaha cuntada iyo cabitaannada aan khamriga ahayn intii lagu jiray bisha.
- Caafimaadka (+0.9%) taas oo ay keeneen kororka qiimaha alaabooyinka caafimaadka iyo adeegyada daryeelka caafimaadka.
- Maqaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+0.7%) taas oo ka tarjumaysa kororka joogtada ah ee qiimaha cuntooyinka maqaayadaha iyo adeegyada hoyga.


Isbeddellada hoos u dhacayada is dheellitiraya ee la diiwaangaliyey waxey ahaayen:

- Warbaahinta iyo Isgaarsiinta (−0.7%).
- Adeegyada Waxbarashada (−0.7%).
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (−0.3%).


Shaxda 3. heerka qaybta boqolkiiba isbeddelka bishii

DHAMAAN QEYBAHA TSB-da	%-beddelka bishiiba		
	luulyo-26	Ogoosto-26	Sebteembar-26
Wadarta guud ee TSB	**0.6%**	**0.4%**	**0.5%**
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	0.9%	0.1%	1.0%
02 - TUBAAKADDA	0.3%	0.0%	0.0%
03 - DHARKA IYO KABAHA	2.0%	-0.4%	0.0%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	-0.6%	1.2%	-0.3%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH…	0.5%	0.4%	0.1%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	0.2%	0.4%	0.9%
07 - GAADIIDKA	0.5%	1.1%	0.1%
08 - MACLUUMAADKA IYO ISGAARINTA	0.4%	0.1%	-0.7%
09 – HAWA BEDELESHO, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	0.6%	1.0%	-0.3%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	-1.2%	1.1%	-0.7%
11 - MAQAAYADAHA IYO ADEEGYADA HOYGA	0.6%	-0.7%	0.7%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	3.5%	1.2%	0.4%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR	0.3%	1.1%	1.2%

Jaantuska 4. Heerka Qeybinta isbadelka Boqoleyda ee Billaha




Jaantuska 5. Tusmooyinka TSB ee dowlad goboled kasta (a) Mudada **Tixraca =2022**



(a) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 6. Boqolleyda ka-qeybqadashada dhibcaha ee heerka sicir-bararka (ka-qeybqadashada heer dowlad gobolled) (a)



(b) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha

Muddadii laba iyo tobanka bilood aheyd ilaa Sebteembar 2026, isbeddellada togan ayaa ka yimid dowlad goboleedyada:


- **Banaadir (+8.7%)** waxaa horseeday kororka ku yimid Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka; Adeegyada Waxbarashada; iyo Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale.
- **Puntland (+7.7%)** waxaa horseeday kororka ku yimid Maqaayadaha iyo Adeegyada Hoyga; Caafimaadka; iyo Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale.
- **Galmudug (+6.8%)** waxaa taageeray kororka Cuntada iyo Cabitaannada Aan Khamriga Ahayn; Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka; iyo kharashaadka la xiriira guryaha.
- **Jubaland (+6.0%)** waxaa taageeray kor u kaca qiimaha waxuuna ku dhacay dhaman Qeybaha isticmaalka.
- **Hirshabelle (+5.5%)** waxaa horseeday kororka ku yimid Gaadiidka; Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka; iyo Alaabta Guriga, Qalabka Guriga iyo Dayactirka Joogtada ah ee Qoyska.
- **Koonfur-galbeed (+5.3%)** waxaa horseeday kororka ku yimid Maqaayadaha iyo Adeegyada Hoyga; Daryeelka Shakhsiga Ah, Daryeelka Bulshada Iyo alaabaha iyo adeegyada; iyo Caafimaadka.

Intii lagu jiray bishii Sebteembar 2026, ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah.

Shaxda 4. Boqolkiiba isbeddelka heerka gobolka

Dowlad Goboleadyada	%- isbeddel sannadle ah		
	Luulyo-26	Ogoosto-26	Sebteembar-26
CPI TOTAL	**6.9%**	**6.8%**	**6.8%**
BANAADIR	5.6%	6.6%	8.7%
PUNTLAND (a)	7.3%	7.9%	7.7%
GALMUDUG	6.8%	6.6%	6.8%
HIRSHABELLE	6.6%	6.1%	5.5%
JUBALAND	9.4%	9.2%	6.0%
KOOFUR GALBEED	6.7%	6.3%	5.3%

(c) Tixraca Puntland waa la qiyaasay



(a) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Billaha ah

Intii lagu jiray Bishii Sebteembar 2026, waxaa ladiiwaangaliyey dhaqdhaqaaqyo togan:

Jubaland (+1.1%) taas oo ka tarjumaysa kor u kaca qiimaha waxuuna ku dhacay dhaman Qeybaha isticmaalka

- **Jubaland (+1.1%)** taas oo ka tarjumaysa kor u kaca qiimaha waxuuna ku dhacay dhaman Qeybaha isticmaalka
- Hirshabelle (+0.7%) waxaa taageeray kororka ku yimid Gaadiidka iyo qaybaha kale ee isticmaalka qoyska.
- **Koonfur-galbeed (+0.6%)** waxaa horseeday kororka ku dhacay qaybo kala duwan oo ka mid ah Qeybaha isticmaalka qoyska.
- **Puntland (+0.4%)** waxaa taageeray kororka kharashaadka Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale, iyo kharashaadka la xiriira Gaadiidka.
- **Banaadir (+0.2%)** taas oo ka tarjumaysa koror yar oo ku yimid qiimayaasha qaybaha kala duwan ee badeecadaha iyo adeegyada la isticmaalo.


Majirin Wax dhaqdhaqaaqyo taban/hoos u dhac ah oo heer dowlad goboleed ah oo bile ah oo dhacay laguma diiwaangelin bishii Sebtembar 2026.

- **Galmudug (0.0%)** ma muujin wax isbeddel ah oo bille ah oo ku dhacay bishii Sebtembar 2026.

Shaxda 5. Heer gobol ayaa isbeddelay boqolkiiba bishii

Dowlad Goboleedyada	%-Isbadalada Bishada		
	Luulyo -26	Ogoosto-26	Sebteembar-26
WADARTA GUUD TSB	**0.6%**	**0.4%**	**0.5%**
BANAADIR	2.9%	-0.8%	0.2%
PUNTLAND (a)	0.6%	0.6%	0.4%
GALMUDUG	1.2%	-0.2%	0.0%
HIRSHABELLE	-1.1%	4.1%	0.7%
JUBALAND	0.3%	-1.8%	1.1%
KOOFUR GALBEED	-0.8%	1.3%	0.6%

a)Tixraca Puntland waa la qiyaasay



(a) Tixraaca Puntland waa la qiyaasey